**URURKA WADDANIGA SOOMAALIYEED**
ku mideysan yihiin dhammaan waddaniga
Nabad, Horumar, Caddaalad iyo Sinnaan

# URURKA WADDINAGA SOOMAALIYEED

بسم الله الرحمن الرحيم

Ururka waddaniga Soomaaliyeed waxaa laga dhawaaqay, 15kii May sannadka 2008, waxaana lagu beegay Maalintii **SYL** la aasaasay, maalintaasoo ah maalmaha Taariikhda leh ku jirta. Ururka magaciisa la yiraahdo ***"Ururka Waddaniga Soomaaliyeed".***

Ururkan waxaa ku midaysan waddaniyiin Soomaaliiyeed oo ku kala nool Soomaaliya gudaheeda iyo adduunka Daafihiisa, Waddaniyiinta ururkan ku midoobay isuguma imaan qabiil iyo dano gaar ahaaneed. Waxay isugu yimaadeen Allah dartiis iyo dhiig waddaninimo.

Sababta dhalisay in ururkan la sameeyo waxay ahayd kaddib markay waddaniyiin Soomaaliyeed fiirsan waayeen marxaladda shacbiga Soomaaliyeed ay maanta ku jiraan, taasoo ummadda ay ku dabadheeraatay colaad joogto ah, abaaro, cudurro, nolol xumo iyo rajo fiican oo aan u soo muuqan oo looga bixi karo dhibkaas.

Ururkan ma'ahan urur hubaysan mana ahan urur leh maleeshiyo u dagaalanta, waa urur bulshadeed (civil Society), urur Samofal ah (Humanitarian Organization), urur wacyigelin iyo baraarujin ah (Advising and consultation), waa urur qayb weyn ka qaadanaya Sixitaanka Siyaasadaha Soomaaliya ka khaldan (Political adjustment).

Waa urur ka wada dhexeeya qof kastoo Soomaaliyeed oo uu ku jiro Dhiig Waddaninimo, Waxayna waddaniyiintaasi u siman yihiin dhulkooda hooyo, waana urur u halgamaaya sinnaan, caddaalad iyo nabad ka dhex dhalata bahweynta Soomaaliyeed.

Ururkan wuxuu u halgamayaa inuu abuuro Soomaali dhab ah oo dalkiisa iyo dadkiisa daacad u noqda, waana urur aan ka shidaal qaadanayn qabiil iyo dano waddamo shisheeye.

# Hal ku dhigga Ururka
## *“Wixii Dhiig lahow Kaca”*

Taariikhda Soomaaliya waxaa soo maray hal ku dhigyo caan baxay kuwaasoo ka dhashay qiiro gobanimaddoon iyo qiiro waddanimo. Hal ku dhigyadaan kuma imaan koox dano gaar ah isugu timid iyo qabiil isasa soo abaabulay, waxay ku yimaadeen kacdoon shacab iyo qiiro waddanimo. Waxaana ka mid ah:

1- “**Hasha Maandeeq”:** Xilligii ay baxday hasha maadeeq waa xilli ay jirtay qiiro waddaninimo oo ay Soomaalida dooranaysay Callan u gaar ah. Calanka waxaa loogu wanqalay Naaneys ah “Hashii Maandeeq”, Naaneystaan waxaa lagu Saleeyey Xoolaha ay Soomaalida Hiddo iyo Dhaqan u leedahay. Sida “**Hasha geela”** Soomaaliyoo dhan waa isku raacday wax khilaaf ahna kama dhicin.

Astaanta Calankana waxaa lagu Saleeyey Midab Buluug ah oo xiddig cad oo 5 geesa leh dhexda uga Taallo, Taasoo lagu macneeyey Cirka Buluugga ah oo Eabbe na siiyey, 5-ta Soomaaliyeed iyo Midabka Cad oo ah Astaan nabadeed.






2- **“Ha Noolaato”** Halku dhiggaan wuxuu ku dhashay kacdoon shacbi oo ay ka buuxday qiiro gobanimodoon ah. Waana kacdoonkii Soomaali u horseeday Gobanimadii lagu diirsaday. Halku dhiggaas “Ha Noolaato”, waxaa lagu daba qabtay erayga ah “Soomaaliya”. Markaas waxaa soo baxay hal ku dhig caan baxay oo ah “Soomaaliya Ha Noolaato”.

3- “**Soomaaliyey Toosoo” Halku** dhiggaan waxay asal ahaan ka soo maaxatay hees qiiro wadaninimo ay ka buuxday, markii dambana waxaa la isku raacay in laga dhigo Astaanta Qaranka ama heesta Calanka (National Anthem). Wax is qabsina ilaa hadda kama taagna, meel kastoo Soomaali isu timaaddo waxay la sara kacaan iskuna baraarujiyaan Heesta Calanka Maadeeq oo ah “**Soomaaliyey toosoo, toosoo isku tiirsanaada”**

Haddaba Ururka waddaniga Soomaaliyeed wuxuu idiin soo bandhigayaa hal ku dhig u baahan Kacdoon Shacbi iyo Dhiig Waddaninimo. Kaas oo ah “**Wixii Dhiig Lahow Kaca”.**

**“Wixii dhiig Lahow kaca”** Macnaheedu ma ahan hubka qaata oo islaaya, ama dagaalama. Waa isbeddel ha lala yimaado, qiiro waddanimo ha la is geliyo. Fadhiga ha laga kaco. Ha la is daba qabto, dhiig ha la isku yeelo, ha la isku naxo, ha la is cafiyo, intii qiiro waddaninimo ay ku dambeyso ha is abaabusho. Kitaabka Allah iyo Sunnada Nabi Maxammed (S.C.W.). ha lagu dheganaado.

Ururka Waddaniga Soomaaliyeed wuxuu Horseed ka noqonayaa abaabulka qiiro waddaninimo iyo Halbeegga ah **“Wixii dhiig lahow kaca”**

# Dhaqanka iyo Diinta

Shacbiga Soomaaliyeed waxay lahaayeen dhaqan u gaar ah kuna salaysan shareecada Islaamka, dhaqankooduna wuxuu lahaa xeerar aasaas u ah oo ay ku kala garbixi jireen, kaasoo markasta sal looga dhigi jiray Diinta Islaamka,wuxuuna shacbiga lahaa Culumo xagga diinta wax ku baraarujin jirtay, dadkana u kala caddeyn jiray xaqa iyo Baadilka,Soomaalida waxay dhaqan u lahayd inay ixtiraamaan culumada diinta waanadoodana qaataan.

Marxaladda hadda jirta, waxyaabahaas oo dhan meesha way ka bexeen waxaana hadda taagan in culimadii Diinta iyo odayaashii dhaqanka la sharaf dilo loona bixiyo magacyo fool xun sida argaggixiso, xitaa waxaa dhacday in si macno-daro ah loo dilo.

Ururka waddaniga Soomaaliyeed iyagoo Xoogga saaraya wacyigelin Bulshadeed iyo baraarujin diimeed wuxuu u howlgalaaya soo celinta Sharaftii iyo Karaamadii uu lahaa xeerkii dhaqanka Soomaaliyeed iyo sharafta muwaadin kasta oo Soomaaliyeed.

Ururkan wuxuu u howlgalaaya soo celinta karaamadii iyo ixtiraamkii ay lahaayeen Culimada Soomaaliyeed, wuxuuna ahmiyad gaar ah siinaya dhaqan celinta Dhallinyarada Soomaaliyeed ee la marin habaabiyey, Dhalinta Soomaaliyeed aan helin fursad waxbarasho iyo fursad nabadeed oo nolol fiican leh.

Carruuta Soomaaliyeed oo agoonta ah oo Waalidkood ay ku dhinteen dagaalladii kala duwanaa ee Soomaaliya ka dhacay iyo carruurta ku naafowday dagaallada.

Ururku wuxuu ahmmiyad gaar ah siinaya dhaqan celinta iyo baraarujinta carruurta Soomaaliyeed oo ku dhaqan iyo Diin doorsoomay waddamada dibadda. Ururku wuxuu u doodayaa dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku jirta xabsiyada adduunka, wuxuu ahmiyad gaar ah siinayaa xallinta iyo khilaafaadka qoysaska Soomaaliyeed ka dhex taagan (family conflict), kaasoo batay furriinka qoysaska oo Saamayn weyna ku yeelatay Carruur badan oo Soomaaliyeed (gudaha iyo dibeddaba).

Ururku wuxuu ahmiyad gaar ah siinaya macnaha erayga “Waddani” sidii loo fahmi lahaa iyo Waddaninimo waxay tahay iyo dhiiragellin Waddaninimo.

Xubnaha ururka meel kastoo ay joogaan ayey ka abaabulayaan qiiro waddaninimo, waxay isu keenayaan waddaniyiin diyaar ah iyagoo ku salaynaya Halbeegga ah “Wixii dhiig lahow kaca”.

Xubnaha ururka waxay leeyihiin hab maamuus (Protocol) ay ku kala dambeeyaan kuna heshiiyeen iskuna ixtiraamaan.

Xubnaha ururka waxay u shaqeeyaan habka **“Iskaa wax u qabso”** (Volunteer System), waqtigoodii iyo Dhaqaalahoodii ayeyna u hureen ururka.

Ururka wuxuu leeyahay **“CODE OF CONDUCT”**

**1- Respectful (Ixtiraam)**
**2- Responsible (Mas’uuliyad)**
**3- Cooperative (wadashaqayn)**

<u>XEERKA URURKA:</u>

Hubnaha ururka iyagoo raacaya sida shareecada Islaamka qabto xeerarka ururka waxaa ka mamnuuc ah, nooc kasta oo “Takoor ah” sida:

1- Jinsiyad (lab iyo dhiddig) la isku takooro
2- Qabiil (Hayb Sooc) la isku takooro.
3- Gobol ama Degmo la isku takooro
4- Lahjad la isku takooro
5- Muuqaal la isku takooro sida: (San iyo Timo)
6- Faqiir iyo Taajir la isku takooro
7- Bukaan ama Curyaan la isku takooro
8- Aqoon ama jaahilnimo la isku takooro
9- Da’ (age) la isku takooro.
10- Reer Baadiye iyo Reer Magaal la isku takooro.

| | |
|---|---|
| 19. Diintuna (Xaqa ah) Eebe agtiisa waa Islaamka, ismana khilaafin kuwii la siiyey Kitaabka intuu u yimid Cilmi mooyee, Xasad (Dulmi) dhexdooda ah dartiis, ruuxii ka Gaalooba Aayaadka Eebe Ilaahay waa deg deg badantahay Xisaabitiisu (wuu Ciqaabi). | إِنَّ ٱلدِّينَ عِندَ ٱللَّهِ ٱلْإِسْلَٰمُ ۗ وَمَا ٱخْتَلَفَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ إِلَّا مِنۢ بَعْدِ مَا جَآءَهُمُ ٱلْعِلْمُ بَغْيًۢا بَيْنَهُمْ ۗ وَمَن يَكْفُرْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَإِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿١٩﴾ |

***Suurat Aali Cimraan Aayaah (19)***

11. Kuwa xaqa rumeeyow yuuna yasin Ragna Rag (kale) waxay u dhawdahay inuu ka khayr badanyahaye, Haweenna yayna haween yasin waxay u dhawyihiin inay ka khayr badanyihiine, hana ceebeynina Naftiinna, hana isugu dhawaaqina naanays xun, waxaa xun magaca faasiqnimada iimaan kadib, Ciddaan tawbad keeninna waa daalimiin.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ عَسَىٰٓ
أَن يَكُونُوا۟ خَيْرًا مِّنْهُمْ وَلَا نِسَآءٌ مِّن نِّسَآءٍ عَسَىٰٓ
أَن يَكُنَّ خَيْرًا مِّنْهُنَّ ۖ وَلَا تَلْمِزُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا۟
بِٱلْأَلْقَٰبِ ۖ بِئْسَ ٱلِٱسْمُ ٱلْفُسُوقُ بَعْدَ ٱلْإِيمَٰنِ ۚ
وَمَن لَّمْ يَتُبْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿١١﴾

12. Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaasuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu jecelyahay midkiinna inuu cuno Hilibka walaalkiis oo mayd ah, waad necebtihiin arrintaa, Eebana ka dhawrsada waa tooba aqbale naxariistee.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ٱجْتَنِبُوا۟ كَثِيرًا مِّنَ ٱلظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ
ٱلظَّنِّ إِثْمٌ ۖ وَلَا تَجَسَّسُوا۟ وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ۚ
أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا
فَكَرِهْتُمُوهُ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ تَوَّابٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

13. Dadow waxaan idinka abuurray lab iyo dhaddig, waxaana idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, Ruuxase ugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay,

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَٰكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَٰكُمْ
شُعُوبًا وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓا۟ ۚ إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ ٱللَّهِ
أَتْقَىٰكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ ﴿١٣﴾

**Aayadahani waa Aayado la yaab leh, oo mu'miniinta ku toosin kuna hanuunin waddada wanaagsan, ugana digi jidka xun sida xaqiraadda yasidda,Naanays xun isugu yeedhidda, is ceebeynta, tuhunka, malaha badan'iyo isjaasuusidda, dhammaan waxyaalahaasuna waa wax ku xun diinta Islaamka, Ruuxa mu'minka xaqa ahna waa inuu ka fogaadaa dhibka walaalihiisa Muslimka iyo Xumayntiisa siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) «Ruuxa muslinka ah waa ka xaaraan muslimka, Xoolihiisa, Sharaftiisa iyo dhiiggiisaba, waxaana shar ugu filan Ruux inuu xaqiro walaalkiisa Muslimka ah». waxaa wariyay Abuu Daawuud iyo Tirmidi. Al-Xujuraat (11-13).**

71. Mu‘miniinta rag iyo Haweenba qaarkood qaarka (kale) waa u Sokeeye waxayna faraan wanaagga kana reebaan xumaanta, waxayna oogaan salaadda, waxayna bixiyaan Zakada, waxayna Addeecaan Eebe iyo Rasuulkiisa, kuwaas waxaa u naxariisan Eebe, illeen Eebe waa adkaade fal sane.

وَٱلْمُؤْمِنُونَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَآءُ بَعْضٍۚ
يَأْمُرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ ٱلْمُنكَرِ
وَيُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُؤْتُونَ ٱلزَّكَوٰةَ
وَيُطِيعُونَ ٱللَّهَ وَرَسُولَهُۥٓۚ أُوْلَٰٓئِكَ سَيَرْحَمُهُمُ ٱللَّهُۗ
إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ حَكِيمٌ ٧١

72. wuxuu u yaboohay Eebe Mu‘miniinta Rag iyo haweenba Jannooyin ay socoto dhexdeeda Wabiyaalkii iyagoo ku waari dhexdeeda, iyo guryo wanaagsan oo Jannada cadnin (Nagaadiga) Raalli ahaanshaha Eebaana ka wayn, arrintaasuna waa uun liibaanta wayn.

وَعَدَ ٱللَّهُ ٱلْمُؤْمِنِينَ وَٱلْمُؤْمِنَٰتِ جَنَّٰتٍ تَجْرِى
مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ فِيهَا وَمَسَٰكِنَ طَيِّبَةً
فِى جَنَّٰتِ عَدْنٍۚ وَرِضْوَٰنٌ مِّنَ ٱللَّهِ أَكْبَرُۚ
ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ ٧٢

**Aayadahani waxay caddeyn in Mu‘miniintu Rag iyo Haweenba sokeeye iyo Qaraabo isu gargaara yihiin, wanaaggana is faraan, xumaantana iskareebaan, Salaaddana si wanaaga u oogaan, Zakadana bixiyaan Eebe iyo Rasuulkiisana adeecaan, waana kuwa naxariista Eebe awoodda lehe falka san muta. Wuxuuna Eebe u yaboohay Jannooyin aan laga guuraynin oo Wabiyaal dhex socdaan, isagoo raalli ahaanshaha Ilaahay ka wayn yahay, waana Liibaanta ugu wayn arrintaasi, waxaana halkaas ka muuqda siday u kala duwanyihiin Tilmaanta Munaafiqiinta iyo tan muminiinta, waxaana ka mid ah tilmaanta Mu‘miniinta inay isku tiirsanaadaan, isuna naxariistaan, siduu rasuulku yidhi (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Mu‘minku Mu‘minka wuxuu u yahay sida dhista qaarkeed qaarka kale u Xoojiyo iyo Xadiithka kale ee caddayn inay jidh kaliya yihiin isuna xanuunsan, sidaas darteed khilaaf badane, xumaan fale, naxariis yare, ma gargaare, mu‘min toosan ma yahay? At-Tawbah (71-72).**

## Ururka waddaniga Soomaaliyeed wuxuu leeyahay ujeeddooyin si cad u qeexan waana sida hoos ku qeexan:

1- Inuu dhowro ciidda Soomaaliyeed isla markaana u howgalo u shaqaynta shacabka Soomaaliyeed, daacadna uu ka yahay shaqada uu dalka u qabanaayo
2- Inuu ku dadaalo midaynta shacabka Soomaaliyeed meel kastoo ay joogaan
3- Howl kasta uu qabanaayo inuu ku shaqeeyo mabd’a wadahalka
4- Inuu Bulshada ka caawiyo aqoondarrida iyo dhibaatada ay leedahay qabyaaladda
5- Inuu bulshada ka caawiyo fahamka diintooda iyo waddaniyadda waxay tahay
6- Inuu ku dadaalo turxaan bixinta cuqdada ummadda dhexdeeda ku baahday, sida is aaminid la’aanta
7- Inuu xoojiyo xuquuqda Bani’aadamka, ka hortagga waxyeellada dumarka iyo carruurta.

8- In manhajka waxbarashada dugsiyada lagu saleeyo shareecada islaamka,ka shaqeeya soo saarista manaahij mideysan oo ku salaysan shareecada Islaamka.

9- Inuu sameeyo tababarro iyo barnaamijyo wacyigelin ah oo ku saleysan waddaninimo waxa ay tahay.

10- Inuu xoogga saaro sidii shacabka dhexdiisa loogu abuuri lahaa jacayl iyo isku kalsoonaan.

Xubnaha ku meel gaarka ah ee Ururka waa sidan:

Xubinimada ururka waa mid u furan waddani kasta oo Soomaaliyeed, kuna jirto dhiig waddaninimo, iyo Muslinimo.

Walaalahayaga waddaniyiinta ah waxaan leenahay ku soo dhowaada ururka, waddanigii danaynaya inuu ka mid noqdo ururka, waxaa marka hore shardi ah inuu soo buuxiyo “Membership Application” (codsi Xubinimo) oo ku qoran luqadaha Ingiriiska iyo Soomaaliga, waxaadna ka heli kartaan Xubnaha Hoose:

Madaxda guddiga fulinta ee ururka Waddaniga Soomaaliyeed:

1- Waddani: Kamaal Xaaji Guuleed (**Pakistan**) --- Guddoomiyaha ururka
2- Waddani: Abdinaasir Maxamed (**Pakistan**) - Gud. Ku Xigeenka **1*aad***
3- Waddaniyad: Zahra Cabdi Xersi (**Holland**) -- Gud. Ku xigeen **2*aad***
4- Waddani: Xuseen Qaasim IIdow (**Mogadisho, Somalia**) la Taliyaha Guddoomiyaha.
5- Waddani: Fu’aad M. Cilmi (**Nairobi, Kenya**) --- Xoghayaha Guud.
6- Waddani: Maxamed Cabdi Gaas (**Garoowe, Somalia**) —- Xoghaynta Ururka.
7- Waddani: Cabdullahi Jaamac ( **Canada**) ----- AF Hayeenka ururka
8- Waddani: Cabdulraxmaan Maxamuud “Caanamac” (**South Africa**) ---------- Guddoomiyaha guddiga Isku xirka gudaha iyo abaabulka.
9- Waddani: Abdirizakh Cabdi Cusmaan “Nageeye” (**USA**) ------- Guddoomiyaha Guddiga wacyigelinta
10- Waddani: Cabdulfataax Cali Yuusuf (**Nairobi, Kenya**). Guddoomiyaha Arrimaha Bulshada.
11- Waddani: Cali Cumar Ibrahim - Gud. Ururinta Aqoonyahanada
12- Waddani: Cabdulraxmaan Siciid “Gentleman” **(UK)**. Guddoomiyaha Maamulka iyo Dhaqaalaha.
13- Waddani: Cali Yaasiin Gurbe (**Uganda**) G. Guddiga Warbaahinta
14- Waddani: Cabdullahi Ciise Cali ----- Guddoomiyha Dib u Heshiisiinta iyo wada hadalka.
15- Waddani:Cabdulrizakh Jaamac Cilmi“Black Yare” **(Mogadisho, Somalia)**. Guddoomiyaha guddiga Wargeyska iyo Qoraallada.

## Guddiga Dastuurka iyo Sharci Dejinta

**1-** Waddani: Ali Cumar Ibraahim: ------------- Guddoomiye
**2-** Waddani: Fu'aad Maxammed Cilmi ---------- Guddoomiye ku xigeen
**3-** Waddani: Cabdinaasir Maxammed ------------- Xubin
**4-** Waddani: Cabdulraxmaan Maxammed Maxamuud "Caanamac" ------- Xubin
**5-** Waddani: Xuseen Qaasim Iidow ------------------- Xubin.

## XUBNAHA URURKA

**Guddiga Abaabulka:**

**1-** Waddaniyad: Fardowsa Axmed (**USA) ----------** **Xubin**
**2-** Waddani: Axmed Raage Aadan **---------------------** **Xubin**

**Guddiga wacyigelinta:**

**1-** Waddani: Yusuf Xuseen Jimcaale (Egypt) **---------- Xubin**
**2-** Waddani: Axmed Cali Cumar "Seeraar" (France) **--------------** **Xubin**

**Guddiga Bulshada:**

**1-** Waddani: Saahid Suuley **-------------------- Xubin**
**2-** Waddani: Cabdullahi Yalaxow Maalin **-------------- Xubin**

**Guddiga wadahalka iyo dib u Heshiisiinta:**

**1-** Waddani: Xassan Cabdullahi Aweys **--------------** **Xubin**
**2-** Waddani**:** Abdullah Macallin (**Saudi Arabia) --------- Xubin**

**Guddiga Xuquuqda Aadanaha:**

**1-** Waddani: Maxammed Axmed Maxamuud "**Joobe" -------- Xubin**
**2-** Waddani: Abdulraxman Maxamud Cusman **"Diita" (UK) ----- Xubin**

**Guddiga Warbaahinta:**

**1-** Waddani: Xassan Cabdullahi Cabdi **"Yeey" (South Africa) -------- Xubin**
**2-** Waddani:

**Guddiga Maamulka iyo Dhaqaalaha:**

**1-** Waddani: Shucayb Zakariya: **---------------- Xubin**
**2-** Waddani:

**Guddiga Ururinta Aqoonyahanada**

**1-** Waddani: Cabbaas Mucallim Shariif Maxammed **-----------** **Xubin**
**2-** Waddani**:** Nuux Naaleeye **-------------------------** **Xubin**

## HIMILLADA URURKA:

Himillada ururka waxaa ka mid ah xagga Warbaahinta iyo wacyigelinta:

**1-** Ururku inuu sameeyo Website u gooni ah
**2-** Ururku inuu sameeyo Idaacad la yiraahdo "**Radio Waddani"**
**3-** Ururku inuu sameeyo Television la yiraahdo "**TV. Waddani"**
**4-** Ururku inuu soo saaro wargeys loogu magac daray **" Wargeyska Waddani"**

**Nasiixa Online (24 hours), Somali Youth Help Line (24 hours)**

**Nasiixa (Waano),** Himillada ururka waxaa ka mid ah inuu sameeyo Khad Telefoon oo Oo bilaash ah **(Toll Free) or Hot line,** or "Online Chatting Room, (Msn or Paltalk). Waxaana Khaasatan loogu talogalay dhallinyarada Somaliyeed oo u baahan waano joogta ah kana lumay AF Soomaaligii, Dhaqankii iyo Diintii, meel kasta ay joogaan, ama luqad kasta oo ay ku hadlaan waxaa diyaar u ah waddani ku waaniya luqadda ay wax ku fahmayaan. Habka waanadana waa **One on One",** waana qarsoodi (Confidential).

Ururka waddaniga Soomaaliyeed, wuxuu waalidiinta Soomaaliyeed meel kasta ay joogaan ka caawinayaa talooyin ku saabsan habka Barbaarinta Carruurta.

Qofkii kaloo u baahan talo ama su'aalo qabo wuxuu ku soo hagaajin karaa www.warhaye.com ama soomaalibaanahay@hotmail.com waxaana diyaar u ah aqoonyahanno iyo Culimo.

## Wargelin Saxaafadda Xorta ah

Dhammaan Saxaafadda xorta ah waxaan ka codsanaynaa in ay noo baahiyaan arrimaha ururka, wax qabadka iyo ujeeddooyinka ururka iyadoon lagu xadgudbeen xeerarka ururka, waxaa arrimaha ururka si ku meel gaar ah loogala xiriiri karaa Web-site-ka www.warhaye.com Warbixinta iyo arrimaha ururka waxaa laga wareysan karaa oo keliya xubaha hoose, iyagoo metalaya magaca xubnaha iyo fikradahooda.

1- Cabdulrizakh Jaamac Cilmi "Black Yare" Tafatiraha www.dadnimo.com isla markaana ah Guddoomiyaha guddiga Wargeyska iyo Qoraallada ee ururka blackyare@hotmail.com

2- Guddoomiyaha ururka "Kamaal Xaaji Guuleed" kamaal111@hotmail.com

3- Abdinaasir Maxamed ----- Gud. Ku Xigeenka Koowaad shubka5@hotmail.com

4- Zahra Cabdi Xersi ------Gud. Ku xigeenka labaad. umubakar@hotmail.com

5- Cabdullahi Jaamac Maxammed -----AF Hayeenka ururka Jama_abdullah@hotmail.com

6- Cali Yaasiin Gurbe -------- Guddoomiyaha Warfaafinta: caliyare200@hotmail.com

**Fiiro gaar ah:**

Wixii su'aal ama talo waxaa lagu soo hagaajin karaa Xubnaha kor ku xusan.

Waa mahadsan tihiin Dhammaan

**URURKA WADDANIGA SOOMAALIYEED**